

Soosaarid Qoraal-yar oo waayoaragnimo Warbixin ku saabsan Dacwada Xeerka Dublin –III- iyo hab socodkiisa

Waxaan rabnaa in aan Qoraalkaan yar idinku Taageerno, si aad kaligaa u qortid, Warbixin ku saabsan waayoargnimada Dacwada Xeerka-Dublin-ee 3aad. Dacwad ku doodeysa ama cuskaneyisa, xaalada guud ee Wadamada ku midowey Xeerka-Dublin-ee 3aad (Midowga Yurub, Iswiserland iyo Norway), kuma filna inay joojiso, in Wadankii aad ka timid dib laguugu celiyo. Maxkamaduhu waxay aad u qiimayaan, sababaha Shaqsiyadeed ee ka horimaanayo celin la celiyo Qofka. Sababaha Shaqsiyeed waxaa ka mid ah, wixii waayoargnimo ah, ee aad kala kulantay wadan kale, kuguna kalifay ama khasbay, inaad wadankaasi ka soo tagto. Sidaa daraadeed, Waxaa aad u muhiim ah, inaad Warbixintaada ku sheegto, Dhibaatooyinkii iyo rafaadkii aad wadankaasi kala kulantay.

Xitaa adiga oon jawaab diidmo ah Maxkamada ka helin, waxaa sii fiican in aad horey uga fekerto, oo aad qortaa waxyaalihii aad la kulantay. Sasbabtoo ah waqtiga Dacwada Racfaanka ama appeal-ka wuu kooban yahay. Waqtiga aad dacwada racfaanka ku qabsan kartaa, waa hal Asbuuc ama sitimaan; Dacwadana waxaad ku gudbin kartaa laba asbuuc ama Sitimaan gudahood, marka laga bilaabo, maalintii aad heshay diidmada celinta ah.

Waxaad qortaa Qoraal faahfaahasan oo tixan, oo aad uga hadlayso waayoargnimadaadii. Waxaad ka soo qaadadataa sidii adiga oo qoraya buugga xusuus qorka ah, taasoo arrimahan aan hoos ku sheegi doono, aad ka dhigataa Tusaale laga feker qaadata. Si fiican u Aqri Dhibcahan hoos ku qoran, ugana jawaab sida ay kuula muuqato oo faahfaahsan oo runta ah. Faahfaahinta waxaa halkan looga jeedaa:

- 1.) inaad si sax ah u sheegto magaca Goobta (sida Magaca Magaaladii iyo Xeradii aad ku jirtay, Hay'adii, Wadadii aad degeneyd). Hadii aadan kuwaasi xasuusan karin, bal isku day in aad tilmaanto. Sida Goobaha, Treen-isteeshanada, Garoonka Diyaaradaha iyo waxyaalaha kale ee indhaha ay qabtaan, sida Taalooyinka ka ag dhaw meeshaad joogtay.
- 2.) inaad isku daydo, in waxyaalihii aad la kulantay ee aad ka warbixinayso, in aad waqtiyayso. Taasi waxaa laga wadaa in aad sheegto, maalintii, bishii iyo sandkii ay waxaas dhaceen.

Warbixintaadu waa in ay si fiican oo shaqsiyeed u faahfaahsan tahay. Waan ognahay in aysan fududeyn, qoritaanka Warbixintaasi. Laakiin Xataa hadii ay kugu culustahay in aad ka warbixiso waayoaragnimada aad lakulatay, hadana isku day inaad isu gaysid dhamaan dhiiranaantaada. Warbixitaas waxay aasaas, gundhig iyo tiir u tahay, dacwada racfaanka ah ee aad kaga hortagayso, in lagu celiyo. Hadii aadan awoodin amaba aadan rabin in aad ka warbixisid wixii aad la kulantay Qaarkood, bal kala hadal la taliyayaasha .

Hadii aad suaal ama sualo badan fahmi waydid, caawimaad ka raadso Saaxiibada, Qof aad taqaan, ama qaraabadaada, ku hadasha Afka Jarmalka. Hadii uu jiro qof latilaye ah oo ka shaqeeya xerada aad degentahay, qofkaas weydii.

Imaanshaha Yurub

Waxaad sheegtaa wadamadii Yurub, ee intaad safarka aheyd, lagugu baaray. Meeshii Faraha lagaaga qaaday ama Macluumaadka shaqsiyada ah (Magac, Sawir iwm) ay Booliiska, Booliska Xadka ilaaliya iyo xafiisyada dawlada kaa diiwaan geliyeen.

- See loo qaaday Macluumaadkaaga shaqsiyeed - Af ama Qoraal?

Flüchtlingsberatung

- imisaad joogtay wadankaasi? Fadlan waxaad magacawdaa, sida ugu suurtagalsan, bishii iyo sanadkii lagugu baaray wadankaas ?
- Ma jirtaa wadan, adoo Xuduudkiisa gudbaaya, ay Booliiska Xadka ku celiyeen, si aadan Xuduudka u gudbin?
- Hadii Booliiska Xuduudka ay ku qabteen: Sidee bey Booliiskaasi adiga kuu la dhaqmaeen?

Noolasha- iyo Xaalda Guriga degaanka ee Wadanka ka midka ah midowga Yurub

Gaar ahaan waxaa muhiim ah, in aad soo bandhigto, noolashaadii iyo hoygii aad degeneyd ee Wadankii aad soo martay, taasi micnaheedu waxay tahay, waa inaad ka warbixisaa markii aad Wadankaas timid, halkii lagu geeyay iyo sidii ay ahayd meeshii lagu geeyey ama lagu dejiyey.

Xeryaha Qoxootiga

Hadii Xerada Qaxootiga lagu bedelay, ugu horayn sheeg, Xerada magaceeda iyo intii aad Xeradaas ku jirtay. Kadibna, ka waran oo tilmaan, shaqsi ahaan, xaaladii nololsha, degaanka iyo xerada lafteedaba. Tilmaantu waa in ay ka koobnaataa qodobadan soo socda:

- Meeqa qof oo qoxooti ah ayaa qiyaastii ku jirtay Xeradaas?
- Xagee iyo sidee baad u seexan jirtay? Qolka ma dad kale ayaad la wadaagi jirtay? Hadii ay jawaabtu haa tahay, meeqa Qof ayaad qolka la qaybsan jirtay? Sariir ma haysatay? hadii aadan haysan, xagee baad seexan jirtay?
- Siday ahayd cuntada? Ma jirtay waqti go'an oo joogta ah ood cuntada heli jirtay? hadii ay jawaabtu haa tahay, ma kugu filnayd cuntadaasi?
- Ma jireen meelaha la isku nadiifiyo, sida Musqulaha?, Sidee bay ahayd xaaladooda nadaafadeed iyo qololkoodaba (ma nadiif, amase wasaq bay ahaayeen)? Suurta gal ma ahyd in aad dharka dhaqato? Ma heli kartay Shaambo iyo saabuun si aad ugu qabaysato?
- Xerada qoxootiga ma Xero xiran ayay ahayd, mise xero furan? Ma ka bixi kartay markaad rabto? Markaad ka baxayso, ma haysatay aqoonsi aad ku baxdo, oo aad hadan dib ugu soo noqoto?
- Ma heli kartay waraaqaha boostada laguugu soo diray? Ma jirtay meel waraaqaha ugu soo dhacaan dadka xerada degen?
- Sidee baad guud ahaan u argtaa Xeradaas qoxootiga ah?

Banaanka Xerada Qoxootiga

a) Hadii aanan Xero Qoxooti ah lagu dejinin:

- Xagee baad habeenkii seexan jirtay? sida Guri, Aqal, Kaniisad, Meelaha ay seexdaan dadka aan guriga lahayn, saaxiibo iyo qaraabo?

b) Hadii Xerada Qoxootiga lagaa sii daayay:

- Markii lagaa sii daayay Xerada Qoxootiga, Ma ka heshay wax caawimaad ah ama macluumaad ah, dadkii xerada ka shaqaynaayay. Mana kuu sheegeen meeshii iyo cidii

Flüchtlingsberatung

aad la xiriiri lahayd? Waxaad fadlan tilmaantaa ama sheegtaa sidii ay ahayd xaaladaada noolaleed, kadib markii aad ka baxday xerada qoxootiga .

- Ma lagu siiyay ama geeyay Guri, markii aad xerada ka baxday? Hadii Guri lagu geeyay: Xagee buu ku yaalay Gurigaas, ilaa inteed joogtay halkaas iyo yaa iska lahaa gurigaas? Sidee bay ahayd nolasha Gurigaasi?

c) Hadii aad noqotay qof aan Hoy lahayn:

- Ilaa intee baad Hoy la´aan ahayd? Xageed seexan jirtay? Ma koox ayaa kula jirtay mise keligaa ayaad ahayd?
- Ma hal magaalo ama Goob keliya ayaad joogtay, mise meelo kala duwan ayaad joogtay intii aad Hoy la´aanta ahayd?
- Sidee ayaad baahidaada asaasiga ah sida (Cunto, Cabitaan, Musqul, Qabays) u dabooshay? Ma jirtay waqti joogta ah oo cunto la bixin jiray, hadii jawaabtu haa tahay, halkee iyo yaa bixin jiray? Ma ahayd cuntadaasi, cuno kugu filan oo ku deeqda inta badan?
- Sidee baad waqtiga qaboobaha ah, qabawga isaga difaaci jirtay?
- Ma isku dayday inaad caawimaad ka hesho, Ururada samafalka ah, Xafiisyada dawlada, Booliiska? Waxaad halkaan fadlan ku sheegtaa waayoargnimadaada ku saabsan arintaasi.

Xabsi gelid(Jeel)

Hadii lagu xiray, ka faallee, sidii xaalada xabsigu ahayd: faalladu waa inay ka kooban tahay: sababta lagu xiray, waqtigii aad xirnayd, iyo intii aad xirnayd inaad heli kartay, sharci u doodaha ama cid xuquuqdaada difaacda.

Guud-Ahaan

Iska Ilaali: Su´aalahan soo socda waxay ku saabsanyihiin, dhammaan waqtigii aad joogtay wadanka ka midka ah wadamada ku midoobay Xeerka Dublin ee 3aad, xitaa intii aad hoy la´aanta ahayd:

- Si joogta ah ma uga heli jirtay, lacag cadaan ah ama wax u dhigma, xafiisyada dawlada? Hadii jawaabtu haa tahay, sheeg fadlan cadadka lacagta cadaanka ah iyo qaabka lagu siin jiray iyo waxa u dhigma lacagta
- Si kale oo aad lacag ku haysatay ma jirtaa? Ma isku dayday inaad shaqo ama guri hesho? Hadii jawaabtu haa tahay, maxaa ka soo baxay? Fadlan sheeg nooc walba oo shaqo ah, oo aad lacag ku heli jirtay.

Jirooyinka(Xanuunada)

- Cudur ama Xanuuno ma qabataa ama ma ku hayeen? Cudurada ama Xanuunada waxaa ka mid ah, kuwa maskaxda ama kuwa jirka, ku dhaca. Hadii jawaabtu haa tahay, waa kuwee cudurada iyo halkay kaaga dhaceen? Sidee ahyd daawayntu: Ma haysatay Dhaqtar iyo Daawo? Hadii jawaabtu maya tahay, waa maxay sababta in lagu daaweeyo aad u heli wayday?

Flüchtlingsberatung

- Wali ma ku hayaa Cudurkaasi ama jiradaasi?

Cunsuriyad/ Dagaal

- Ma la kulantay Cunsuriyad ama Dagaal? Hadii jawaabtu haa tahay, fadlan si faah-fahsan u sheeg, hadii ay suurta gal tahay, qofkii ku cunsuriyeeyay. Ma jirtaa hal mar ama marar badan oo aad la kulantay xaalad aad u xun oo aad xasuusan karto?

Dacwada Qoxootiga

Hadii aad wadan ka mid ah midowga wadamadani, qoxootinimo waydiisatay, ka sheeke habsocodkii Dacwada Qoxootinimada:

- Ma jiray Waraysi, Dhegaysi? Maxaa ka soobaxay dacwadii Qoxootinimada?
- Ma heshay Degenansho ama warqado kale oo Aqoonsi ah? Ilaa iyo imisa Sano ayuu aqoonsigaas ama degenaanshahaasi jirayaa? Weli ma haysataa Aqoonsigaas?
- In laguugu celiyo wadankaad ka timid ma laguugu hanjabay

Safarkii Kale(safarkii Xigay)

- Goormaad ka soo tagtay wadankii ka midka ahaa midowgani? Maxay ahayd sababtii aad ooga soo tagtay wadankaasi? Ma jirtay sabab cad, mise waxay aheyd xaaladda guud ee nololeed? Sidee buu ahaa safarkii aad Jarmalaka ku soo aadday?
- Ma laguugu qabtay wadan kale oo ka mid ah Midowgani? Halkaas ma lagaaga qaaday Dacwad Qoxootinimo, ama wadankaad ka timid dib laguugu celiyey?

Impressum:

Diakonisches Werk Kassel – Flüchtlingsberatung

Verfasserin: Stephanie Rokoss

Übersetzung: Ibrahim Haji (SKA Sozialkritischer Arbeitskreis Darmstadt e.V./ Flüchtlingsberatung)

Redaktion: Helga Sievers (DW Kassel/Flüchtlingsberatung) und Karin Diehl (Diakonie Hessen/Flucht, interkulturelle Arbeit, Migration)

Dezember 2014